



Racfaanka PCA

PCA Appeals

Haddii Laguu Diidmo Haynta (PCA)

Haddii lagugu sameeyey qiimeynta adeegga PCA oo aadan u baahneyn adeegga PCA, ama qiimeynta sanadlaha ah lagu yareeyey saacadaha lagu ogolaaday laakiin aadan ku raacsaneyn, waxa aad la qaadan kartaa racfaan. Ogeysiiska waxaa la socada sida aad racfaan uga qaadan karto.

Sidee ayaan ku bilaabaa racfaanka?

Bilowga racfaanka waa mid ku xiran in aad leedahay ceymiska maareynta caafimaadka iyo in kale. Ceymiska maareynta caafimaadka waxaa maamula Ucare, Medica iyo kuwo kale.

Haddii aad leedahay ceymiska maareynta caafimaadka

Si toos ah ula xirii ceymiska, ama faakis ama iimeyl ugu soo dir waraaqda. Lambarka telefoonka, faakis lambarka, iyo cinwaanka loo soo dirayo racfaanka waxa uu la socdaa ogeysiiska ceymiska caafimaadka. Telefoonkooda waxa sidoo kale ku qoran yahay kaarka caafimaadka iyo warqadaha kale ee ceymisku kuu soo diro. Waxa aad u sheegtaa in aad dooneyso in aad racfaan ka qaadatao.



- Waa in aad racfaan ku qaadataa 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhga ogeysiiska qiimeynta.
- Haddii aad dooneyso in aad heysato saacadaha PCA ee lagu ogolaaday, waa in aad ku cadeysaa racfaankaaga oo aad racfaan ka qaadataa
 - 1) toban cisho gudahood ka dib marka uu ku soo gaaro ogeysiiska.
 - 2) Ka hor taariikhda ay ku eg tahay saacadaha PCA oo ay joogsanayaan ama la yareeyo (hadba kan dambeeya).

Haddii aad ku guuleysato racfaanka oo ceymiska caafimaadka ay bedelaan go'aankooda, wax dheeraad ah in aad sameyso lagaama doonayo. Waa fikrad wanaagsan in hay'adda PCAda kuu ah aad wargeliso in aad ku guuleysatay racfaanka waana in ay wargeliyaan ceymiska caafimaadka.

Haddii aadan ku guuleysan, talaabada xigta waa in aad racfaan u qaadata gobolka. Akhri “Sidee racfaan loogu qaataa gobolka” ee hoos ku xusan.

- Waa in aad racfaan ugu qaadataa gobolka 120 cisho gudahood laga bilaabo taariikhda ku qoran warqadda go’aanka ceymiska.
- Haddii aad dooneyso in aad isticmaasho saacadaha PCAga ah mudada aad sugayso racfaanka gobolka, waa in aad ku cadeysaa racfaankaaga oo aad racfaankaaga ku soo gudbiso 10 cisho ka dib marka ay ku soo gaarto warqadda go’aanka ceymiska.

Haddii aadan heysan ceymiska maareynta caafimaadka:

Si toos ah racfaan ugu qaado gobolka si laguugu qabto dhageysiga racfaanka DHS ee Qaaliga Adegga dadweynaha. Racfaankaaga waa in aad qoraal ahaan ugu soo gudbisaa bogooda internetka. Akhri “Sidee racfaan loogu qaataa gobolka ?” ee hoos ku xusan.

- Waa in aad racfaan ku qaadataa 30 maalmood gudahood ee taariikhda ogeysiiska. Laakiin waxa aad racfaan ka qaadan kartaa ilaa 90 maalmood haddii ay jirto “sabab macquul ah” (sabab wanaagsan) oo aad ula daahday racfaanka. 90 cisho ka dib suurogal ma aha in aad racfaan qaadata.
- Haddii aad dooneyso in aad heysato saacadaha PCA ee lagu ogolaaday, waa in aad ku cadeysaa racfaankaaga oo aad racfaan ka qaadataa
 - 1) toban cisho gudahood ka dib marka uu ku soo gaaro ogeysiiska.
 - 2) Ka hor taariikhda ay ku eg tahay saacadaha PCA oo ay joogsanayaan ama la yareeyo (hadba kan dambeeya).




Sidee ayaan racfaan ugu qaataa gobolka?

Waa in aad buuxisaa foomka ama waraaq ku soo qortaa racfaankaaga. **Telefoon aad u soo dirto kuma filna in aad ku bilowdo racfaan aad qaadata.** Waxaa jira habab kala duwan oo aad racfaankaaga ku soo gaarsiin karto gobolka.

Shabakadda internetka:

Waxa aad [buxin kartaa foomka](https://mn.gov/dhs) oo aad racfaankaaga ku soo gudbin karto barta internetka ee Waaxda Adeegga Dadweynaha (DHS). Soo booqo:

<https://mn.gov/dhs>.



- Guji “How do I” (Sidee ayaan) ee dhinaca sare ee bogga
- Oo hoos timaada “Find” guji “edocs and forms” (qoraalada iyo foomamka).
- Guji luqada aad doneyso.
- Ku qor 0033 halka baaritaanka
- Guji “Fill and submit form” (buuxi oo dir foomka) (Haddii aad dooneyso in aad daabacdo foomka oo maran oo boostada soo dhigto ama fakis ku soo dirto guji “Print blank form”)

Foomka barta internetka isaga oo dhan buuxi. Guji “Print Form” (daabac foomka) ee dhinaca midigta ee shaashada si aad u daabacato. Ka dibna guji “Submit Appeal” ee dhinaca hoose ee midigta.

Boosta soo dhig ama faakis ku soo dir

Waxa foomka oo maran aad ka daabacan kartaa bogga DHS ama aad ka qaadan degmada. Haddii aadan dooneyn in aad isticmasho foomka dhib kuma jiro haddii aad waraaq ku soo qorto oo aad boostada soo dhigto ama aad faakis ugu soo dirto gobolka.

Ha hilmaamin in aad warqadaada ku soo darto waxyaabahan:

- In aad racfaan ka qaadaneysa saacadaha PCA oo lagaa yareeyey iyo sababta.
- Weydiiso in aan lagaa joojin oo laguu sii wado mudada aad sugayso racfaanka.
- Haddii aad dooneyso in aad shaqsi ahaan ka qeyb qaadato dhageysiga, ku caddee racfaanka. Haddii aadan codsan in aad shaqsi ahaan ka qeyb qaadato, telefoonka ayaa lagu dhageysanayaa.
- Haddii aad dooneyso turjubaan, codso oo sheeg luqadda aad dooneyso.

Ha hilmaan in aad ku qorto warqadda lambarka dacwadda iyo taariikhda. Nuqul ka sameyso. Warqadda gaarsii shaqaalaha degmada ama boostada soo dhig ama faakis ku soo dir.


Minnesota Department of Human Services Appeals Office

PO Box 64941

St. Paul, MN 55164-0941

Telefoonka: 651-431-3600

Faakis: 651-431-7523



Heyso cadeynta muujineysa in aad soo dirtay.
Warqadda faakiska ee cadeyneysa in la diray.

Sidee ayaan isugu diyaarin karaa Dhageysiga Racfaanka?

Waxaa lagu soo dirayaa ogeysiiska taariikhda dhageysiga ee Qaaliga Adegga Dadweynaha. Haddii aad dooneyso waqti dheeraad ah oo aad isku diyaariso, ama adan iman karin taariikhda lagu qabtay, qaaliga weydiiso inuu “dib u dhigo.” Dib u dhigiddu waxa ay ka dhigan tahay in qaaligu maalin kale kuu qabto dhageysiga. Telefoon lambarka lagala xiriiri karo DHS oo aad ku codsan karto in dib loo dhigo dhageysiga waxaa aad kaheleysaa ogeysiiska.

Ka soo qaado warbixintii ugu dambeysay ee diiwaanka caafimaadka

dhakhtarkaaga iyo cisbitaalada, gurmada degdegga ah iyo goobohii caafimaadka ee aad dhawaanta tagtay. Degmada iyo maareynta daryeelka caafimaadka ayaa bixinaya lacagta aad ku heleyso diiwaanka diiwaanka caafimaadka. Waxa kale oo aad weydiisan kartaa dhakhtarkaaga inuu qoro waraaq ku saabsan xaaladaada iyo sababta aad ugu baahan in PCA ku caawiyo.

Haddii aad racfaanka u qaadaneysa saacadaha PCA oo lagaa yareeyey, **soo diyaarso qiimeyntii hore ee PCAga**. Haddii aad leedahay ceymiska caafimaadka, weydiiso ceymiska caafimaadka in ay kuu soo diraan qiimeyntii hore. Waxa kale oo aad weydiisan kartaa hayadda PCAga kuu ah ama degmada.


Waxa aad keeni kartaa mardhkaatiyaal dhinacaaga ah dhageysiga. Adiga, iyo qofka ku ah PCAga, iyo dadka kale ee la socda xaaladaada iyo sababta aad ugu baahan tahay caawinaadda PCAga oo aad ka hadli kara dhageysiga. Qaaligu waxa uu doonayaa inuu ogaado magacyada markhaatiyaasha iyo telefoon lambarkooda.

Boostada ku soo dir ama faakis qoraalada iyo macluumaadka markhaatiyaasha dhageysiga ka hor. Sidoo kale nuqulka ama koobiyada dhamaan waxyaabaha aad ka hesho ceymiska ama degmada. Haddii dhageysiga qof ahaan aad kaga qeyb geleyso warqadaha waxa aad keeni kartaa dhageysiga.

Maxaa xiga dhageysiga racfaanka ee DHS ka dib?

Dhageysiga ka dib, qaaliga ayaa kuu soo diraya go'aan qoraal ah. Haddii uu go'aan qaaliga mid aadan ku guuleysan, waxa aad DHS weydiisan kartaa in ay "dib u eegaan," ama waxa aad racfaan uga qaadan kartaa Maxkamadda Degmada aad degan tahay. Go'aanka qaaligu gaaro ee qoraalka ah waxaa la socda sida racfaan looga qaato, waxa kale oo aad ka akhrin kartaa xogta urursan ee [Racfaan Uga Qaadashada Macaashka Dadaweynaha Maxkamadda Degmada](#).

Faahfaahin ku saabsan dhageysiga ama sida racfaan looga qaato go'aanka dhageysiga DHS, ka akhri [Su'aalaha inta badan la is weydiin karo \(FAQs\)](#) ee bogga internetka ee DHS. Soo booqo <https://mn.gov/dhs>.



- Ku qor "appeal FAQ" (su'aalaha la iska weydiin karo racfaanka) halka erayga laga baarto.
- Guji "*Su'Aalaha Inta Badan La Is Weydiin Karo Racfaanka/Waaxda Adeegga dadaweynaha ee Minnesota*"

Caawinaad dheeraad ah

Haddii aad dooneyso caawinaad dheeraad ah oo ku saabsan racfaanka PCA ama dooneyso in lagaa caawiyo racfaanka, la soo xiriir [xafiiska degaanka ee gargaarka sharciyada \(legal aid office\)](#) sida ugu dhaqsaha badan si lagu caawiyo ama laguugu diro meel aad caawinaad ka hesho. Waxa aad ka heli kartaa macluumaadka xafiisyada gargaarka sharciga <http://www.lawhelpmn.org/so> oo gujiya magaca xafiiska aad dooneyso in aad la xiriir.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.